# XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA

## WARBIXIN SANADEEDKA 2021

Madax-banaani | Isla-xisaabtan | Hufnaan | Caddaalad | Xirfalenimo

## TUSMO

**TUSMO** ........ i

**Liiska Xarfaha la soo Gaabiyay** ........ v

FARRIINTA XEER ILAALIYAHA GUUD ........ 1

**HORDHAC** ........ 3

HIGSIGA XAFIISKA ........ 4

YOOLKA XAFIISKA ........ 4

QIYAMKA ASAASIGA AH ........ 4

ISTIRAATIJAYADDA XAFIISKA 2021-2025 ........ 4

UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 1: ........ 5

**UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 2:** ........ 5

UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 3: ........ 6

UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 4: ........ 7

**UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 5:** ........ 8

**UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 6:** ........ 8

**JAANTUSKA 1: QAABDHISMEEDKA XAFIISKA XEER ILLAALIYAHA GUUD** ........ 9

**ASAASIDA WAAXYO CUSUB OO KU SALAYSAN QAAB-DHISMEEDKA CUSUB** . 10

**TIRAKOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD** ........ 10

**Tirakoobka Taararka** ........ 10

Jaantuska 2: Taararka 2021 oo bille ah ........ 10
Jaantuska 3: Taararka 2021 ........ 11
Jaantuska 4: taararka sanadka 2021 oo boqolay ah ........ 11
Jaantuska 5: Faahfaahinta Gungaarada oo Bilaysan ........ 12
Jaantuska 7:Gungaarada 2021 oo Boqolay ah ........ 13

Jaantuska 8: Faah faahinta Taararka la keenay iyo natiijada Gungaaradoodi 13
Jaantuska 9: Faafaahinta Taararka la keenay iyo Gungaaradooda 14

ISBARBARDHIGA KIISASKA SANNADKI 2020 IYO SANNADKAN 2021 15

SABABAHA KORORKA DACAWADA SANNADKAN 16

CABASHOOYINKA 2021 16
Jaantuska 13: cabashooyinka 2021 17
Jaantuska 15: Cabashooyinka 2021 oo boqolay ah 18
Jaantuska 17: Cabashooyinka Madaniga noqday 18

ISBARBARDHIGA CABASHOOYINKA SANNADADA 2020 IYO 2021 19

KIISASKA CARUURTA LA TUURAY 20

WARBIXINTA KORMEERKA XABSIYADA IYO BOOLISKA 20

UJEEDADA KORMERKA 20

NATIIJADA KORMEERKA 20
Jaantuska 20: Kor-u-kaca Dacawaha kaddib Kormeerka 21

TIRAKOBKA DACWADAHA XAFIISYADA XEER ILAALINTA DXDF 23

TIRAKOOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER ILAALINTA GAL-MUDUG 23
Jaantuska 21: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021 23
Jaantuska 22: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021 oo billeysan 23
Jaantuska 23: Noocyada Dembiyada oo boqoley ah 24
Jaantuska 24: 10-ka kiis ee ugu badan 24

TIRAKOOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER ILAALINTA JUBALAND 25
Jaantuska 25: Tirakoobka Kiisaska Sanadka 2021 Ee XX Jubaland 25
Jaantuska 26: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021 oo billeysan 25
Jaantuska 27: Shanta Kiis ee ugu Badan XX Jubalaan 2021 26
Jaantuska 28: Muuqaalka Boqoleyda Noocyada Dembiyada 2021 26

TIRAKOOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER ILAALINTA HIR-SHABEELE 27
Jaantuska 29: Tirakoobka Dacwadaha XX Hir-shabeele 2021 27
Jaantuska 30: Dacwadaha XX Hir-shabeele 2021 oo bille ah 27
Jaantuska 30: Dhammaan Noocyada Dembiyada XX Hir-shabeele 2021 oo bille ah 28

TIRAKOOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER KOONFUR GALBEED ........ 28
Jaantuska 31: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed ........ 28
Jaantuska 31: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed oo bille ah ........ 29
Jaantuska 32: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed oo boqoley ah ........ 29

TIRAKOOBKA DACWADAHA XAFIISKA XEER ILAALINTA PUNTLAND ........ 30
Jaantuska 33: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Puntland ........ 30
Jaantuska 33: muuqaalka dembiyada Sanadki 2021 ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Puntland ........ 31

**KOBCINTA TAYADA SHAQAALAHA XAFIISKA** ........ 32

**Qaadashada Xeer Ilaaliyayaal cusub** ........ **32**

........ **34**

**QORSHAHA KU-TABABARKA-SHAQADA XEER ILAALIYAASHA CUSUB** ........ 35

**QAYBTA TABABARRADA XAFIISKA** ........ 36

**AQOON IS-WAYDAARSIGA XAFIISKA IYO QORSHAYNTA** ........ 37

**Qorshaynta Gudaha** ........ **37**

AQOON IS-WAYDAARSIGA XAFIISKA ........ 38

........ **40**

**Tababarrada Kale** ........ **40**

**TABARKA KAALIYEYAASHA XAFIISKA** ........ 43

**XIRIIRKA XAFIISYADA XEER ILAALIN DXF IYO XIGQ** ........ 44

**Tababarka Xeer Ilaaliyaayaasha iyo Baarayaasha DXF** ........ **45**

**XIRIIRKA XXGQ IYO MAXKAMADAHA** ........ 50

**WADA-TASHIGA HA'YADAHA GARSOORKA DALKA** ........ 51

**Go'aannada Shirka** ........ **51**

**ADKAYNTA XIRIIRKA XAFIISKA IYO HAY'ADAHA CAALAMKA** ........ 52

**WACYIGALINTA HAWLAHA XAFIISKA** .......... 54

**CUDURKA KORONAFAYRAS 2019 (COVID-19)** .......... 56

## Liiska Xarfaha la soo Gaabiyay

1. **XIGQ**: Xeer Illaaliyaha Guud ee Qaranka
2. **DXF** : Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka
3. **XNG**[1]: Xeerka Nidaamka Garsoorka
4. **XHC**[2]: Xeerka Habka Ciqaabta
5. **JFS:** Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

---

[1] Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lam. 3 ee 12, June 1962, iyo Xeer Lambar 34, 1974.

[2] Xeerka Habka Ciqaabta Xeer Lanbar 1, 1da June, 1963.

## Farriinta Xeer Ilaaliyaha Guud

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ



Marwooyin iyo Mudanayaal,

Waxaa sharaf weyn ii ah inaan idinla wadaago Warbixin Sannadeedka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka (XIGQ) ee sannadkii tagay ee 2021. XIGQ waa xafiis uu xil ka saaran yahay u adeegidda bulshada, hubsashada in la dhawro sharuucda dalka loona hoggaansamo isla markaana dhidibada loo taago nidaam cadaalad danbiyeed oo hufan, daahfuran, daacad ah, dhexdhexaadna ah.

Warbixin sannadeedkan dhinacyada badan taabanaysa oo ah sannadkii labaad oo sidaas oo kale loo diyaariyo, waxaan guud ahaan ku xusi doonnaa xaqiijinta yoolka iyo ujeeddooyinka Xafiiska u degsan. Warbixintaan waxay si qota dheer u qeexaysaa waxqabadka, guulaha, iyo caqabadaha soo wajahay xafiiska sannadkii la soo dhaafay waxayna oddoraysaa mustaqbalka dhow iyo kan fog sida ku cad istaratijiyada XIGQ 2020-2024.

Warbixintu waxay dulmari dadaalada Xafiiska ee dib loogu xoojinayo ka hortagga iyo ka dabatagga danbiyadda gaar ahaan: la-dagaallanka danbiyadda qorshaysan, musuqmaasuqa, tacaddiyada jinsiga iyo tahriibinta. Dadaaladaasi waxay ifafaalo u noqon karaan xoojinta sarreynta sharciga, cadaaladda iyo qotiminta kalsoonida bulshada ee hay'adaha garsoorkaa gaar ahaan XIGQ.

Su'aali kamaa taagna in xeer-talintu saldhig u tahay habsami u socodka dhammaan laamaha kala duwan ee cadaaladda si loo gaaro sinnaan, kala danbayn iyo isla-xisaabtan dhab ah. Hab dacwad-oogis xirfadaysan aqoon iyo kartina ku dhisan ayaa udub-dhexaad u ah in XIGQ uu meelmariyo xeerarka ciqaabta iyo sharuucda kale dalka. Dib-usoo-noolaynta iyo sii hormarinta howlaha XIGQ waa hawl socota oo oo aan kaliya ku ekeyn la socoshada baarista dambiyada iyo dacwad-oogidda, waxaa kaloo xafiiska ku howlan yahay dadaal dheerna ugu jira sidii sare loogu qaadi lahaa dib-u-habaynta xeerarka khuseeya dacwo-oogista iyo sidii loo mideyn lahaa howlaha dhamaan Xeer Ilaalinta Qaranka heer Federal iyo heer Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF). Taasi waxay gacan ka geysanaysaa

helidda dacwad-oogis leh halbeegyo, nidaam iyo siyaasad midaysan oo ku dhisan aqoon-is-weydaarsi, wadashaqayn iyo iskaashi.

Waxaa Xafiiska sharaf wayn u ah in lagu tallaabsaday taabbagalinta qorshaha istiraatijiyadeed ee 2020-2024. Wuxuu Xafiisku u arkaa inay lagama maarmaan tahay in la adkeeyo isku xirnaanta, wada shaqaynta iyo iswaydaarsiga aqooneed ee ka dhaxeeya XIGQ iyo Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF. Mid ka mid ah hawlaha hortabinta leh ee uu Xafiisku xoogga saaray ayaa ah in la kobciyo awoodda Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF. Si loo dhiso awooddaa waxaa xogga la saaray in la tababaro Xeer Illaaliyayaasha iyo waliba baarayaasha ka hawlgala dhammaan DXF. Tababarradaa waxaa ka fa'idaystay 140 Xeer ilaaliye iyo Baare oo ay 26 ka mid ahi dumar yihiin.

Waxaa sannadkii tagay sidoo kale xoogga aan saarray casriyenta iyo kobcinta awoodda qorshayn ee iyo darsidda xiriirka Xafiisku la leeyahay hay'adaha ay wadashaqaynta leeyihiin sida Booliska iyo Maxkamadaha. Hawlahaas waxaa laga gaaray natiijooyin wax ku ool ah.

Iyada oo uu cudurkii Coranavirus uu saameyn togan ku yeeshay dhammaan adeeg-bixinta, haddana sida aad warbixinta ka dheehan kartaan wuxuu xafiisku ku guulaystay inuu kordhiyo dacwadaha ciqaabta ee sannadkan in ka badan 60%.

Ugu danbayn waxa aan u mahadnaqayaa guddigii diyaariyay ee soo saariay warbixintan iyo dhammaan shaqaalaha kala duwan ee ka qaybqaatay hawshan aadka u taya sarraysa. Waxaan sidoo kale bogaadinayaa dhamaan shaqaalaha Xafiiska ee u heellan hirgalinta iyo xaqiijinta istiraatiijiyadda iyo horumarinta Xafiiska. Waxaan u rajeynayaa sannad wacan oo wanaagsan ku waara nabad iyo caafimaad iyo Naxariista Alle.

وبالله التوفيق

**Sulaymaan Maxamed Maxamuud**
**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

# Hordhac

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka (XIGQ), waxaa si rasmi ah loogu asaasay Xeerka Nidaamka Garsoorka, Sharci Lanbar 3, ee 12 Juun ee 1962. Xafiiska XIGQ waa hay'ad ka mid ah hay'adaha garsoorka dalka. Waajibaadka Xafiiska waxaa lagu faahfaahiyay Cutubyada II, VII, VIII ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya (JFS), Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

Waajibaadka Asaasiga ah ee Xafiiska waxaa ka mid ah:

1. Ilaalinta xuquuqda Dastuur iyo midda sharci ee muwaadiniinta isagoo u maraya nidaamka cadaalad-danbiyeedka.
2. Baaritaanka, diyaarinta iyo oogidda dacwadaha ciqaabta ah;
3. Illaalinta danaha dawladda, hay'adaha ,dadweyna, iyo kuwa nugul ama naafada ah;
4. Ilaalinta danta guud iyodoo la unkayo, la oogayo ama laga qaybgalayo dacwadaha madaniga ah marka ay lagama maarmaan noqoto.
5. Hagidda iyo kormeeridda baaritaanka iyo ka hortagga fal-danbiyeedyada;
6. Ilaalinta badqabka iyo xuquuqda maxaabiista iyadoo la joogtaynayo kormeerka xabsiyada iyo goobaha kale ee dadka lagu xiro;
7. Kor-u-qaadida iyo kobcinta dawlad wanaagga iyo is la xisaabtanka hay'adaha dadweynaha iyadoo la baarayo cabashooyinka ka dhanka ah xuquuqaha asaasiga ah iyo xorriyadaha, ku takri falka awoodda, dhaqamadda silloon, naxariis darrada, dhaqan-xumada iyo xurma darrada muwaadiniinta;
8. Diyaarinta iyo gudbnita warbixin sanadeedka ku saabsan maamulka cadaalad-danbiyeedyada ee loo gudbiyo Aqalada Baarlamaanka Federaalka iyo guud ahaan dadweynaha; iyo
9. Gudashada dhammaan waajibaadyada kale ee lagu xusay Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Dalka.

## Higsiga Xafiiska

**Higsiga Xafiisku waa:**

> **in la yagleelo xafiis ku suntan adeeg heer sare ah oo ilaaliya xuquuqda muwaadiniinta sidoo kalana dhiirrigaliya maamul cadaalad oo hufan, badqabka dadweynaha iyo dhawridda sharciga.**

## Yoolka Xafiiska

Yoolka Xafiisku waa :

> **in la helo adeeg xeer ilaalin oo madax-bannaan, dhexdhexaad ah oo leh xirfad, una adeega si ay ku dheehan tahay hufnaan, dhawridda xuquuqda muwaadiniinta, hubinta ixtiraamka sharciyada, helidda kalsoonida daweynaha, ilaalinta maamul cadaalad-danbiyeed iyo ku dhaqanka dastuurka oo dalka oo dhan ka hirgala.**

## Qiyamka Asaasiga ah

1. Cadaalad
2. Madax-bannaani
3. Hufnaan
4. Isla-xisaabtan
5. Xirfadlenimo.

## Istiraatijayadda Xafiiska 2021-2025

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Qaranaku wuxuu leeyahay Qorshe Istritijayadeed. Waxaan halkan ka xusaynaa ujeedooyinka istiraatijadeed ee qorshaha iyo hawlaha u baahan in lagu tallaabsado si loo gaaro ujeedooyinkaa.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 1:

**Kobcinta Waajibaadka Sharciyeed iyadoo la adeegsanayo Nidaam Hogaamin oo Hufan kuna Dhisan Tabo Maamul oo Hufan**

1. Kor u qaadida hogaaminta wanaagsan si loo dardargeliyo fulinta iyo bixinta adeegyo tayo leg iyada oo la fulinayo qaabdhismeedka hogaaminta hufan si loo kordhiyo waxtarka bixinta adeegyadayada.
2. Kormeerka iyada oo loo marayo xafiiska Hantidhawrka Gudaha iyo ilaalinta heerarka si waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa xafiiska.
3. Baddelida dhaqanka xeer ilaalinta si loo ilaaliyo daacadnimada fulinta howlaha xeer ilaalinta.
4. Maareynta khataraha iyo waxqabadka iyada oo loo marayo nidaamyada xakamaynta gudaha ee adag iyo habdhaqanka maaraynta waxqabadka wax ku oolka ah.
5. Hirgelinta dhaqamada wanaagsan ee ku saabsan hufnaanta, warbixinta, isgaarsiinta iyo baarista si loo bixiyo isla xisaabtan wax ku ool ah.
6. Kobcinta awooda xafiiska si uu ugu maareeyo agabkiisa si wax ku ool ah, xilkasnimo iyo isla xisaabtan leh.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 2:

**Hubinta Dhawridda Sharciga iyo Ilaalinta Xuquuqda Dadka Nugul iyo Kuwa Naafada ah**

1. Xaqiijinta iyo dammaanad qaadka xuquuqda aasaasiga ah ee Dastuurka iyo in la hubiyo u hoggaansanaanta iyo hirgelinta shuruucda.
2. Hirgelinta, ilaalinta iyo horumarinta ku dhaqanka sharciga iyo xuquuqda aadanaha iyada oo la sare loo qaadayo dhaqanka ixtiraamka shuruucda.
3. La-dagaalanka musuq-maasuqa ka dhex jira nidaamka dowliga ah iyo in la sameeyo habab lagu baaro dhammaan xadgudubyada iyo ku xad-gudbida shuruucda ka dhex jirta nidaamka dowladda.
4. kuhogaaminta hab habaysan oo heer kasta ah si wax looga qabto arrimaha dembiyada iyo badbaadada ee danaha guud oo ay ku jiraan dhibaatooyinka dembiyada ee soo ifbaxaya iyada oo la horumarinayo ka hortagga dembiyada iyo xeeladaha xakamaynta dembiyada, Tilmaamaha iyo heerarka si wax ku ool ah si loo

tirtiro dhammaan noocyada rabshadaha, gaar ahaan rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo carruurta. .

5. In la ilaaliyo xuquuqul insaanka dhibanayaasha tabarta daran iyo kuwa nugul, markhaatiyaasha qaybta ka ah geeddi-socodka dacwad-qaadista dembiyada iyadoo la horumarinayo lana xoojinayo nidaam wax ku ool ah oo ilaalinaya xuquuqdooda.
6. Baadhitaano toos ah oo boolisku sameeyo iyo in la hubiyo in xeer ilaaliyeyaashu u gutaan waajibaadkooda shaqo si dhexdhexaadnimo ah iyo inay fuliyaan danta guud.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 3:

**Kobcinta Awoodda Adeegga Xeer Ilaalinta**

1. In la ilaaliyo halbeegyada xirfadeed ee ugu sarreeya iyo horumarinta dhaqanka ixtiraamka, sharafta, kala duwanaanshaha sinnaanta, isla xisaabtanka iyo hufnaanta.
2. In kor loo qaado aqoonta iyo xirfadda dadkeena iyadoo loo marayo maaraynta aqoonta.
3. Qorista iyo haysashada shaqaale heersare ah si loo kordhiyo hufnaanta loogana jawaabo dhammaan adeegyada xeer ilaalinta ee waajibka ah si waafaqsan waajibaadkayaga iyo heerarka caalamiga ah.
4. Dhiirigelinta hal-abuurka iyo ka-qaybgalka horumarinta adeegyada.
5. Bixinta hindise cusub ee kudhisan tiknooloojiyada casriga ah (modern ICT system) oo dadkeenna ka taageera gaarsiinta heerka adeegga loo baahan yahay ee macaamiisha.
6. Bixinta jawi shaqo oo badbaado iyo ammaano ah oo ilaalinaya dadkeena, macluumaadka iyo agabka kale si loo suurtageliyo waxtarka, adkeysiga iyo samaqabka.
7. Joogteynta tababbarada xeer ilaaliyayaasha, iyo shaqo ku tababaridda xeer ilaaliyaasha cusub.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 4:

**Kobcinta Maamul Xeer Ilaalin iyo Adeeg-Baariseed Hufan, Wax-ku-oola kuna Dhisan Hannaanka Nidaamka Cadaalad-Danbiyeedka**

1. Hirgelinta qiyamka asaasiga ah ee xafiiska, ilaalinta iyo xoojinta madax-bannaanida iyo isla xisaabtanka xeer ilaalinta.
2. In la bixiyo adeegyo xeer ilaalineed oo takhasus leh, farsamo iyo xirfad leh lana kordhiyo diiraddana la saaro natiijooyin hawl-karnimo.
3. Dib-u-eegista, horumarinta, iyo cusboonaysiinta siyaasadaha iyo habraaca xeer ilaalinta iyo baadhista.
4. Hirgelinta nidaam hubinaya in si joogto ah loogu dhaqmo siyaasadaha iyo hab-raacyada u degsan xafiiska si loo gaaro  cadaalad-oogid wax ku ool ah.
5. Xaqiijinta u hoggaansanaanta mabaadi'da Dastuuriga ah ee garsoor, cadaalad inta lagu jiro baaritaanka iyo dacwad-oogista.
6. Hubinta in cutubyada/waaxyaha XIGQ ay haystaan qalab, khibrad iyo sahayda lagama maarmaan u ah si ay wax uga qabtaan kiisaska dembiyada.
7. Kordhinta qorsheyaasha diiradda saaraya natiijooyinka oo dib u qiimeeya qaabdhismeedka natiijooyinka iyo bixinta adeeg dacwad-qaadis oo isku xidhan oo hubinaya in eedeeysaneyaashu caddaalad helaan.
8. Dhisida habab ku haboon xaqiijinta saxsanaanta iyo dhamaystirka wakhtiga loogu talagalay warbixinnada baadhista si looga fogaado khaladaadka iyo xadgudubyada xeer ilaalinta, korna loogu qaado isla xisaabtanka fulinta sharciga, loona xaqiijiyo daacadnimada xeer ilaalinta.
9. Unkidda iyo hirgelinta habraacyo qeexan oo xaqiijinaya nidaam wax-ku-ool ah oo lagu hagaajinayo qaybinta culayska dacwadaha iyo in la hubiyo in warbixinnada baarista dib loo eego, laguna dhammaystiro wakhtiga sharciga loo qoondeeyey.
10. Kobcinta aqoonta iyo wacyiga muwaadiniinta ee la xiriira helida adeegyada Xafiisyada iyada oo la adkaynayo isku xirnaanta hay’adaha iyo kor u qaadista wacyiga dadkeena.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 5:

**Sare U Qaadida Iskaashiga Daneeyayaasha Nidaamka Cadaalad Danbiyeedka Iyo Hay'adaha Goboleed Iyo Kuwa Caalami Si Loo Tayeeyo Adeegga**

1. In la joogteeyo xiriir wanaagsan oo lala yeesho madaxda muhiimka ah ee nidaamka garsoorka dambiyada ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka.
2. In laga qayb qaato madallada heer qaran, heer gobol iyo heer caalami si loo horumariyo aragti iswaydaarsiga iyo horumarinta iskaashiga dhinacyada.
3. In uu XIGQ gacan ka geysto oo una doodo dib-u-habaynta ururada garsoorka dambiyada iyo Shuruucda Ciqaabta ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyada oo la soo bandhigayo cilmi-baaris ku habboon iyo la-talinta go'aannada siyaasadeed.
4. In la joogteeyo xiriirka hay'adaha caalamiga ah ee xeer ilaalinta iyo nidaamyada cadaaladda dembiyada si loo hubiyo in si sax ah loo horumariyo Isbaddalada socda.
5. Horumarinta iskaashiga istiraatijiyadeed iyo xoojinta ka qaybgalka daneeyayaasha caalamiga ah ee nidaamka cadaaladda dembiyada iyo hay'adaha kale ee gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya si loo hagaajiyo tayada shaqadeena asaasiga ah.

## UJEEDOOYINKA ISTIRAATIJAYADEED 6:

Joogtaynta Kalsoonida Dadweynaha ee Adeegga Xeer Ilaalinta

1. Helidda, ilaalinta iyo soo bandhigga xog dhamaystiran oo sax ah oo ku saabsan shaqada xafiiska.
2. Hagaajinta bixinta adeegyada tayada leh ee dhibanayaasha iyo markhaatiyada.
3. Hubinta in jilayaasha la falgala dhibbanayaasha iyo markhaatiyada ay u hoggaansamaan siyaasadaha xafiiska iyo tilmaamahiisa khuseeya la-dhaqankooda.




Jaantuska 1: Qaabdhismeedka Xafiiska Xeer Illaaliyaha Guud

## Asaasida Waaxyo cusub oo ku salaysan qaab-dhismeedka cusub

Qaab-dhismaaedka Xafiiska XIGQ waxaa lagu sameeyay dib-u-habeyn ka turjumaysa hawlaha uu u xilsaaran yahay. Waxaa xoogga la saaray in la abuuro waaxo cusub iyadoo wax laga baranayo noocyada dacwadaha iyo muhimadda ay leedahay in xeer ilaaliyayaashu lahaadaan takhasus gooni ah. Waxaa sidoo kale la nidaamiyay dhinaca maamulka oo aan isagana looga maarmin waxqabadka hawsha xeer ilaalinta. Sidaa darteed, waxaa la magacaabay Xoghaye Guud oo ay hoos yimaaddaan waaxaha maamulka ee Xafiiska sida agaasinnada maamulka iyo maaliyadda, shaqaalaha, macluumaadka iyo Qorshaynta. Waxaa durba la magacaabay waaxda Danbiyada Badda ka dhaca oo hadda soo badanaya iyadoo la raacayo qaab-dhismeedkan cusub. Waxaa kaloo iyadana la asaasay Waaxda Hagidda Baarista Booliska si loo dardargaliyo isku-xirnaanta iyo wada shaqaynta Booliska iyo Xafiiska xeer ilaaliyaashuna u gutaan waajibkooda sharciga ah.

## Tirakobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Waxaan qaybtan ku soo qaadan doonnaa tirakoobka dacwadaha soo gala Xafiiska. Guud ahaan waxaan sida aan faahfaahin doono koror xoog leh ku yimid dacwadaha ciqaabta ah. Dhinaca kale waxaa hoos u dhac muuqda iyana ku dhacay cabashada loo soo gudbiyo Xafiiska Xeer Illaaliyaha Guud ee Qaranka. Waxaa sida aan faahdaahin doono, labaddaa arrimoodba ay ku yimaaddeen dadaal mira dhal ah oo Xafiisku sameeyay.

Galalka soo gala Xafiiska Xeer Illaaliyaha Guud ee Qaranka waxay u kala baxaan, cabashooyin ay dadweynuhu Xafiiska si toos ah ugu soo gudbiyaan iyo kuwa ciqaabta ka yimaadda Booliska. Waxaa cabashooyinka raacsan galalka ka yimaadda maxkamadaha oo ay ku codsanayaan in la baaro fal ka soo dhexbaxay gal ay gacanta ku hayaan.

### Tirakoobka Taararka

#### Dacwadaha Ciqaabta XIGQ ee Booliska ka yimaada (Taararka Booliska)

Xafiifka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka sanadkan 2021 waxaa soo gaaray Taarar gaarayo 1,425 kiis waxaa ayna u bilaysnaayeen sidan :-

| | *Jan* | *Feb* | *Mar* | *April* | *May* | *June* | *July* | *Aug* | *Sept* | *Oct* | *Nov.* | *Dec.* | *WadartaGuud* |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ***TAAR*** | 101 | 98 | 95 | 93 | 117 | 124 | 152 | 147 | 130 | 140 | 117 | 111 | **1,425** |

Jaantuska 2: Taararka 2021 oo bille ah




Jaantuska 3: Taararka 2021




Jaantuska 4: taararka sanadka 2021 oo boqolay ah

| Nooca Go'aan la gaaray | Jan | Feb | Mar | Abr | May | Jun | Jul | Aug | Sep | Oct | Nov | Dec |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Kiisaskaaan wali go'aan lagaama gaarin | 8 | 17 | 17 | 21 | 15 | 20 | 27 | 32 | 31 | 38 | 70 | 47 |
| Kiisaska la xukumay | 28 | 12 | 16 | 19 | 13 | 21 | 20 | 19 | 11 | 11 | 3 | 0 |
| Kiisaska Dembi lagu wayey/la sii daayey | 16 | 11 | 9 | 10 | 18 | 21 | 18 | 25 | 14 | 8 | 0 | 0 |
| *Kiisaska muddo dhaafka lagu sii daayay* | 0 | 7 | 5 | 0 | 5 | 3 | 0 | 2 | 2 | 2 | 6 | 0 |
| *Kiisaska gal-xirida Xafiiska* | 11 | 9 | 7 | 13 | 7 | 10 | 12 | 16 | 6 | 9 | 0 | 0 |
| *Wadar* | 63 | 56 | 54 | 63 | 58 | 75 | 77 | 94 | 64 | 64 | 79 | 47 |
| ***Wadarta Guud 798*** | | | | | | | | | | | | |

Jaantuska 5: Faahfaahinta Gungaarada oo Bilaysan




Jaantuska 6: Gungaarada 2021 oo bilaysan




Jaantuska 7:Gungaarada 2021 oo Boqolay ah

| *Taarka* | *XaaladdaTaarka* | *Faalo* |
|---|---|---|
| *100 gal* | XIGQ ayaa ***Gal xiris*** ku sameeyay | Kaddib markii ay dacwadda kala laabteen dhibanayaashi ama laga heshiiyay |
| *163 gal* | Darajada 1aad ayaago'aan ka gaartay (***Gal-xiris***) | Maxkamadda Darajada Kowaad ayaa xirtay |
| *173 gal* | Waala xukumay ***Darajada 1aad*** | 89 kiis way dhamaadeen<br>65 kamid ah waxey marayaan ***darajada 2aad***<br>19 ka mid ah waxey marayaan ***darajada 3aad*** |
| *343 gal* | Waxay marayaan Darajada 1aad | Dacwadeynta ayaa socota |
| *512 gal* | Rugaha Boliis ka ayaa siidaayay | Qeybta Waliyoow Cadde (71)<br>Qeybta Galbeed (95)<br>Qeybta Bari (89)<br>Qeybta Bartamaha (65)<br>Hoggaanka Baarista Dembiyada CID (81)<br>Qeybta Nabadgalyada Wadooyinka (111) |
| *102 gal* | Baaristooda ayaa socota | Garsugayaal (Roomaan) |
| *32 gal* | Mudo dhaaf ayaa lagu siidaayay | Baarista Ayaan lagu dhammayn wakhtigii loogu tala galay |

Jaantuska 8: Faah faahinta Taararka la keenay iyo natiijada Gungaaradoodi




Jaantuska 9: Faafaahinta Taararka la keenay iyo Gungaaradooda




Jaantuska 10: Faahfaahinta faldanbiyeedyada




| | kiisaska socda | xukun xabsi | xukun siideyn | mudo dhaaf | Gal-Xirid | Gungaarkoodi ayaa maq... | Total |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| tirada | 19 | 5 | 10 | 0 | 2 | 9 | 45 |

Jaantuska 11: kiisaska carruurta

## Isbarbardhiga Kiisaska Sannadki 2020 Iyo Sannadkan 2021

Markii uu Xafiiska XIGQ is-barbar dhigay kiisaska soo galay Xafiiska sannadkii 2020 iyo sannadkan 2021, waxaa ay kordheen kiisaska sannadka sida ku muuqata jaantuska 12[aad] in ka badan 60%.




| | JAN | FEB | MAR | APR | MAY | JUN | JUL | AUG | SEP | OCT | NOV | DEC | Wadarta |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| SANADKA 2020 | 77 | 79 | 59 | 56 | 67 | 78 | 72 | 79 | 104 | 77 | 79 | 60 | 887 |
| SANADKA 2021 | 101 | 98 | 95 | 93 | 117 | 124 | 152 | 147 | 130 | 140 | 117 | 111 | 1425 |

Jaantuska 12: Isbarbardhiga Dacwadaha Sannadada 2020 iyo 2021

## Sababaha Kororka Dacawada Sannadkan

Xafiiska XIGQ sannadkan wuxuu xoogga saaray kormeerada xarumaha Booliska iyo Xabsiyada Gobolka Banaadir taasoo dhintay kiisaskii ay Boolisku ku dhamayn jireen xarumahooda..

Waxaa sida aan qormada kormeerka Xafiiska ku xusi doonno, Waaxda Kormeerka Xarumaha Boliiska iyo Xabsiyada booqdeen sannadkan dhamaan xarumaha wax lagu xiro ee dhan ee gobolka. Waxay daalacdeen kiisaska Buuga Dambiyada Guud, waxayna warbixin ka dhagaysteen Taliyayaasha Xarumahaas. Taliyayaasha waxay ka warbixiyeen sababaha loo xiray muwaadin xabsi ku jira, haddii la siidaayayna sababta iyo cidda sii daysay. Waxaa la adkeeyay habka helidda Warbixinta Dambi (TAARKA) ee lagu ogaysiiysayo XIGQ laguna hubiyo in la tuhunsanaha iyo dhibbanaha kiisaskaas helaan cadaalad si waafaqsan xeerarka dalka.

Waxaa kaloo lagu sababayn karaa kororka dacwadaha ciqaabta iyadoo oo isbaddal xoog leh lagu sameeyay nidaamka hagidda baarista ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Waxaa galka sidii hore xeer ilaaliye lagu qori jiray marka uu soo gaaro gungaarka Xafiiska. Haddase waxaa galka xeer ilaaliye lagu qoraa islamarka la helo taarka, si ay u fududaato dabagalka galalka, wadashaqaynta, loona hubiyo in galka baariddiisa si hufan loogu soo dhammaystiro wakhtiga ku habboon, wax muddo dhaaf ahina aanu ku imaan.

### Cabashooyinka 2021

Cabasho waa codsi ay dadweynuhu Xafiiska si toos ah ugu soo gudbiyaan si loo baaro loogana qaado tallaabada ku habboon. Cabashooyinka ayaa marka xafiisku iskii u baaro ama uu la kaashado hay'adaha baarista ayaa marar badan soo baxdaa inay yihiin cabashooyin madani ah. Markaana xafiisku wuxuu qaadaa tallaabada ku habboon oo noqon karta inuu cabashada xiro ama muwaadinka cabanaya uu kula taliyo inuu u gudbiyo maxkamadda awooda u leh. Cabashooyinka waxay muwaadiniintu uga fa'idaystaan inay helaan adeeg bilaash ah dagdagna ah.

Waxaa soo galay Xafiiska sannadkan 663 cabasho. Cabashooyinka badan inkasta oo hoos u dhac xoog leh ku yimid ayaa lagu sababayn karaa kalsoonidda lagu qabo Xeer Ilaalinta iyo Guud ahaan Garsoorka oo kordhaysa iyo sare u qaadida tayada adeega bilaashka ah uu Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu bixiyo.

| | *Jan* | *Feb* | *Mar* | *Abr* | *May* | *June* | *Jul* | *Aug* | *Sept* | *Oct* | *Nov* | *Dec* | *Wadarta Guud* |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ***CABASHO*** | 89 | 47 | 101 | 55 | 48 | 66 | 38 | 62 | 48 | 42 | 46 | 21 | **663** |

Jaantuska 13: cabashooyinka 2021




Jaantuska 14: Cabashada 2021



Jaantuska 15: Cabashooyinka 2021 oo boqolay ah




Jaantuska 16: Cabashda waxay u qeybsantay Ciqaab iyo Madani




Jaantuska 17: Cabashooyinka Madaniga noqday




Jaantuska 18: Cabashooyinka Ciqaabta Noqday




Jaantuska 19: Isbarbardhiga Cabashooyinka Sannadada 2020 iyo 2021

## Isbarbardhiga Cabashooyinka Sannadada 2020 iyo 2021

Marka la is barbardhigo Cabashooyinka soo galay xafiiska sannadkii 2021 aad ayay uga yar yihiin kuwa sannadkan 2021. Sannadkii hore waxaa jiray cabashoyin lagaga cabanayay barnaamijkii FOREX ee lacagaha badan looga lunsaday muwaadiniin badan.

Cabashooyinka sannadkan marka la barbardhigo sannadkii hore waxay hoos u dhaceen in ka badan 33%. Waxaa sidoo kale lagu sababayn karaa hoos u dhaca cabashooyinka iyadoo loo sameeyay nidaam lagu koontaroolo cabashooyinka madaniga ah marka ay Xafiiska soo galaan inta aan loo gudbin baaris inay madani yihiin iyo in kale. Haddii ay sidaa noqdaana tallaabada ku habboon ayaa laga qaadaa.

## Kiisaska Caruurta la Tuuray

Waxaa jiro tiro kiisas carruur ah oo bannaanada la dhigay iyo kuwa isbitaalada looga dhuuntay kuwaas dhamaantooda Xafiiska Xeer Ilaaliayaha Guud ee Qaranka wuxuu ka gutay waajidkiisa sharci ee saaran. 8daa kiis ee carruur la soo tuuray Xafiisku wuxuu hubiyaa in mas'uuliayadooda laga warhayo wuxuuna la socdaa xaaladooda caafimaad iyo nololeedba. Carruurtaas 6 ka mid ah waa gabdho 2da kalana wiilal.

## Warbixinta Kormeerka Xabsiyada iyo Booliska

Xafiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo gudanaya waajibaadkiisa kormeer, wuxuu kormeeray Saldhigyada Boliiska Degmooyinka Gobolka Banaadir iyo xabsiyada kale. Kormeerka guud waxay ahayd in la qabto bishiiba halmar. Laakiin waxaa la qabtay laba mar oo kala ah bilihii May 2021 iyo September 2021. Sababaha kallifay inuu kormeerku u qabsoomi waayo bishiiba mar waxaa ugu muhiimsan iyadoo la raacayay talooyinka Wasaaradda Caafimaadka ee la xiriira xakamaynta cudurka COVID-19.

## Ujeedada Kormerka

Kormeerka waxaa looga gol-lahaa inay Saraakiisha Saldhigyada Boliiska Gobolka Banaadir iyo Xabsiyada ay u noqoto dhiirigalin iyo in uu jiro isla xibaatan si ay u wanaagsanaato shaqada ay u hayaan bulshada Soomaaliyeed ee ku nool Gobolka Banaadir iyo Degaanada ku dhaw.

Hadafka laga lahaa Kormeer uu xafiiska waxaa ka mid ahaa: .in la hubiyo la tuhunsane kasta oo lagu soo xiro Saldhigyada Boliiska Gobolka Banaadir muddo 24 saac ah lagu keeno warbixinta danbi, iyo gungaarada baarista la helo iyadoo aanay dhicin daahid aan macquul ahayn ama laga baaqsado muddo dhaaf.

## Natiijada Kormeerka

Kormeerka kaddib waxaa sare u kacay Taarka ( Warqad War Dambi ) ee ka imanayay Saldhigyada Boliiska, Qeybta Nabadgalyada Waddooyinka, Hoggaanka Baarista

Dembiyada CID iyo Laanta Ilaalada Canshuuraha iyo waliba gungaarada soo daahi jiray oo yaraaday. Waxaa kormeerka kaddib sare u kacay wadashaqaynta Xafiiska iyo Booliska Gobolka Banaadir. Arrintani waxay muujinaysaa xiriirka tooska ah ee ka dhaxeeyaa kormeerka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu ku sameeyo Xarumaha Boliiska iyo Xabsiyada iyo dardargalinta hawlaha Booliska. Sidaa darteed waa lagama maarmaan in la joogteeyo.




Jaantuska 20: Kor-u-kaca Dacawaha kaddib Kormeerka

Waxaa kaloo la aaminsan yahay in in joogtaynta kormeerka Xarumaha Boliiska iyo Xabsiyada la ay xal u noqon karto gudashada waajibaadka hay'adaha iyo inay yaraato danbiyada aanla soo gaarsiinin Xafiiska Xeer Ilaaliayaha Guud ee aan soo dhaafin Xarumaha Boliiska.

Kormeerka iyo qiimeynta Xafiisku uu ku sameeyay waxaa natiijo la taaban karo ah tusaale ahaan uga soo qaadan karnaa kaddib markii Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka u gudbiyay Madaxweynaha JFS natiijadii kasoo baxday kormeerkii joogtada ahaa ee lagu sameeyay xabsiyada taasoo keentay in maxaabiis ku xiran Xabsiyada Muqdisho uu ka siidaayay Madaxweynuhu cafis isagoo raacaya tala-soo-jeedinta XIGQ. Waxaa cafiskaa ka fa'idaystay kuwaas 179 maxbuus oo ku xukanaa dembiyo fudud.





# Tirakobka Dacwadaha Xafiisyada Xeer Ilaalinta DXDF

## Tirakoobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaalinta Gal-Mudug

| | | | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **XEER ILAALINTA GALMUDUD<br>FADLAN SOO DAR BISHA KAA MAQAN** | | | | | | | | | | | | | |
| **TIRAKOOBKA KIISASKA SANNADKA 2021** | | | | | | | | | | | | | |
| | **Janaayo** | **Febaraayo** | **Maarso** | **April** | **May** | **Juun** | **Julay** | **Agoosto** | **Sebteember** | **Oktoobar** | **Noveember** | **diseember** | **W. guud** |
| **Gungaar** | 24 | 8 | 5 | 9 | 7 | 4 | 16 | 8 | 6 | 8 | 21 | 5 | **121** |
| **Cabasho** | 11 | 6 | 4 | 7 | 14 | 9 | 4 | 12 | 8 | 8 | 12 | 6 | **101** |
| **WADARTA GUUD** | | | | | | | | | | | | | **222** |

Jaantuska 21: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021




Jaantuska 22: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021 oo billeysan




Jaantuska 23: Noocyada Dembiyada oo boqoley ah




Jaantuska 24: 10-ka kiis ee ugu badan

## Tirakoobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaalinta Jubaland

| XEER ILAALINTA JUBA-LAND | | | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Tirakoobka Kiisaska Sannadka 2021** | | | | | | | | | | | | | |
| | **Janaayo** | **Febaraayo** | **Maarso** | **April** | **May** | **Juun** | **Julay** | **Agoosto** | **Sebteember** | **Oktoobar** | **Noveember** | **diseember** | **W. guud** |
| **Taarka** | 46 | 34 | 23 | 25 | 38 | 34 | 28 | 32 | 42 | 25 | 38 | 28 | **393** |
| **Cabasho** | 21 | 18 | 12 | 16 | 11 | 13 | 9 | 7 | 17 | 23 | 19 | 9 | **175** |
| **WADARTA GUUD** | | | | | | | | | | | | | **568** |
| **Tirade Taararka Gungaarkooda la Keenay lana Horkeeyay Maxkamadaha Awooda u leh** | | | | | | | | | | | | | |
| **Gungaar** | 25 | 24 | 16 | 17 | 19 | 17 | 18 | 15 | 19 | 18 | 16 | 13 | **217** |

Jaantuska 25: Tirakoobka Kiisaska Sanadka 2021 Ee XX Jubaland




Jaantuska 26: Tirakoonbka Dacwadaha Sanadka 2021 oo billeysan




Jaantuska 27: Shanta Kiis ee ugu Badan XX Jubalaan 2021




Jaantuska 28: Muuqaalka Boqoleyda Noocyada Dembiyada 2021

## Tirakoobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaalinta Hir-Shabeele

| XEER ILAALINTA HIR-SHABELE | | | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021** | | | | | | | | | | | | | |
| | **Janaayo** | **Febaraayo** | **Maarso** | **April** | **May** | **Juun** | **Julay** | **Agoosto** | **Sebteember** | **Oktoobar** | **Noveember** | **diseember** | **W. guud** |
| **Taarka** | 10 | 7 | 13 | 30 | 15 | 20 | 23 | 17 | 11 | 13 | 30 | 3 | **192** |
| **Cabasho** | 0 | 2 | 10 | 8 | 7 | 9 | 18 | 7 | 12 | 10 | 2 | 1 | **76** |
| **WADARTA GUUD** | | | | | | | | | | | | | **268** |

Jaantuska 29: Tirakoobka Dacwadaha XX Hir-shabeele 2021




Jaantuska 30: Dacwadaha XX Hir-shabeele 2021 oo bille ah




Jaantuska 30: Dhammaan Noocyada Dembiyada XX Hir-shabeele 2021 oo bille ah

## Tirakoobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Koonfur Galbeed

| XEER ILAALINTA KOONFUR-GALBEED | | | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021 | | | | | | | | | | | | | |
| | **Janaayo** | **Febaraayo** | **Maarso** | **April** | **May** | **Juun** | **Julay** | **Agoosto** | **Sebteember** | **Oktoobar** | **Noveember** | **diseember** | **W. guud** |
| **Gungaar** | 31 | 22 | 30 | 34 | 26 | 19 | 24 | 30 | 21 | 23 | 26 | 9 | **295** |
| **Cabasho** | 5 | 8 | 7 | 9 | 10 | 6 | 5 | 8 | 5 | 7 | 4 | 2 | **76** |
| **WADARTA GUUD** | | | | | | | | | | | | | **371** |

Jaantuska 31: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed




Jaantuska 31: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed oo bille ah




Jaantuska 32: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee XX Koonfur Galbeed oo boqoley ah

## Tirakoobka Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaalinta Puntland

| No | Dembiyada | Nugaal | Bari | Karkaar | Cayn | Mudug | Sanaag | Hay'land | Sool | Gardafuu | Total | Average |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | **Dil** | 32 | 22 | 14 | 43 | 18 | 23 | 1 | 53 | 5 | **211** | **23.4** |
| 2 | **Kufsi** | 39 | 16 | 12 | 0 | 21 | 6 | 0 | 4 | 2 | **100** | **11.1** |
| 3 | **isku day kufsi** | 0 | 0 | 8 | 0 | 2 | 0 | 0 | 0 | 0 | **10** | **1.1** |
| 4 | **Tuugo** | 81 | 94 | 70 | 207 | 36 | 87 | 10 | 0 | 16 | **601** | **66.8** |
| 5 | **Daroogo** | 68 | 57 | 0 | 313 | 21 | 56 | 26 | 0 | 9 | **550** | **61.1** |
| 6 | **Dagaal safayn** | 5 | 46 | 0 | 46 | 1 | 20 | 32 | 0 | 14 | **164** | **18.2** |
| 7 | **Khiyaamo** | 19 | 20 | 0 | 27 | 12 | 10 | 5 | 0 | 0 | **93** | **10.3** |
| 8 | **Dhac** | 49 | 69 | 45 | 0 | 19 | 2 | 11 | 0 | 0 | **195** | **21.7** |
| 9 | **Tahriib** | 11 | 30 | 0 | 13 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | **55** | **6.1** |
| 10 | **Isku day dil** | 6 | 0 | 0 | 0 | 6 | 0 | 19 | 0 | 0 | **31** | **3.4** |
| 11 | **Dhaqan celin** | 95 | 39 | 47 | 0 | 39 | 0 | 0 | 17 | 0 | **237** | **26.3** |
| 12 | **Dhaawac** | 63 | 72 | 28 | 190 | 53 | 92 | 67 | 18 | 19 | **602** | **66.9** |
| 13 | **Dhul** | 0 | 0 | 0 | 31 | 1 | 0 | 4 | 0 | 0 | **36** | **4.0** |
| 14 | **Lunsasho hanti qaran** | 9 | 29 | 0 | 6 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | **44** | **4.9** |
| 15 | **Burcad** | 11 | 11 | 0 | 55 | 39 | 0 | 5 | 6 | 0 | **127** | **14.1** |
| 16 | **Tacadi Dumar** | 3 | 18 | 0 | 0 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | **22** | **2.4** |
| 17 | **Khasaare hanti** | 31 | 21 | 0 | 5 | 15 | 0 | 2 | 0 | 0 | **74** | **8.2** |
| 18 | **Nabad galyo xumo** | 6 | 25 | 0 | 55 | 7 | 0 | 34 | 0 | 2 | **129** | **14.3** |
| 19 | **Tacadi Caruur** | 3 | 18 | 0 | 0 | 6 | 0 | 0 | 0 | 0 | **27** | **3.0** |
| 20 | **Qarax** | 0 | 1 | 0 | 0 | 5 | 0 | 0 | 0 | 0 | **6** | **0.7** |
| 21 | **Afduub** | 5 | 0 | 0 | 0 | 2 | 0 | 0 | 0 | 0 | **7** | **0.8** |
| 22 | **labo guursi** | 7 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | 3 | 0 | 0 | **11** | **1.2** |
| 23 | **Jiriifka Badda** | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 | **1** | **0.1** |
| 24 | **Hanjabaad** | 11 | 0 | 0 | 0 | 6 | 0 | 0 | 0 | 0 | **17** | **1.9** |
| | **Gobal kasta Totalkiis:** | **554** | **589** | **224** | **991** | **311** | **296** | **219** | **98** | **68** | **3350** | **T guud** |
| | **Gobal kasta Averagekiis%** | **44.3** | **47.1** | **17.9** | **79.3** | **24.9** | **23.7** | **17.5** | **7.8** | **5.4** | **268.0** | **A guud** |

Jaantuska 33: Tirakoobka Dacwadaha Sanadki 2021 ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Puntland




Jaantuska 33: muuqaalka dembiyada Sanadki 2021 ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Puntland

## Kobcinta Tayada Shaqaalaha Xafiiska

### Qaadashada Xeer Ilaaliyayaal cusub

Waxaan xusnay baaxadda iyo waajibaadka sharci uu leeyahay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Shaqadaas culus waxay u baahan tahay mar walba in la dardargaliyo laguna kabo dhiig cusub oo ku soo kordhin kara fikir iyo hannaan cusub oo shaqo. Kaddib markii uu garwaaqsaday Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka inay lagama maarmaan tahay in la qaato xeer ilaaliyayaal cusub oo hawshaa gudan kara, waxaa u bannaanayd in sidii loo qaadan jiray, loogana bartay nidaamka shaqaaleysiinta dawladda la xulo dad shuruudaha marka ay ugu fiican yihiin buuxin kara sidaana lagu hawlgaliyo.

Taa baddalkeeda wuxuu Xafiisku go'aansaday in loo raaco xulashada iyo shaqaalaynta 20ka xeer ilaaliye si daahfuran, daacad ah, hufan oo la jaanqaadaysa hannaanka ay marka danbe ku shaqayn doonaan iyo cadaaladda laga filayo inay oogaan. Waxaa adag qof ku soo baxay ama lagu shaqaaleeyay waasdo ama yaad taqaanaa laga filo ama lagu khasbo inuu ku shaqeeyo si ka duwan sida uu ku soo baxay.

Iyadoo laga salaynayo nidaam daahfuran waxna lagana baranayo khibraddii Maxkamadda ee lagu xushay garsoorayaasha iyo kaaliyayaasha ayaa waxaa Xeer Ilaaliyaha Guud magacaabay guddi khubaro ah oo hawsha hagta oo ka kala socday Xafiiska, Maxkamadaha, Wasaaradda Cadaaladda, Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed iyo Ururka Qareenada Soomaaliyeed. Hawlaha ay guddigani qabteen waxaa ka mid ahaa diyaarinta shuruudaha xulista, diyaarinta imtixaanka iyo sixiddiisa. Shuruudaha guddiga u dajiyay qofka noqon kara xeer ilaaliye, waxay ahaayeen:

1. Muwaadinimo Soomaaliyeed;
2. Haysasho ugu yaraan darajada koowaad ee jaamacad la aqoonsan yahay oo la xiriirta qaanuun, ama qaanuun iyo shareeco; iyo
3. Lahaansho ugu yaraan laba (2) sano oo khibrad la xiriirta qaanuunka;
4. Waxaa xusid mudan in si loo dhiirrigaliyo inay dumarka Soomaaliyeed uga fa'idaystaan aynu u fududaato inay shuruudaha buuxiyaan loo ogolaaday gabadhii Soomaaliyeed ee haysata shahaadada jaamacadeed in aan lagu xirin khibrad shaqo.

   **F.G**. Haddii uu qofku haysto shahaadada darajada labaad ama tan saddexaad, waa laga dhaafay khibradda shaqada.

Waxaa ogaysiiska shaqada lagu daabacay goobaha sida caadiga shaqooyinka lagu xayaysiiyo iyo waliba bogga Facebook ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka[3]. Waxaa soo codsaday shaqada oo buuxiyay shuruudihii arji soo diridda muwaadiniin ka badan 700 oo qof oo ka soo kala dalbaday dhammaan gobolada dalka oo dhan iyo dibaddaba.

Kaddib Xeer Illaaliyaya Guud ee Qaranka ayaa magacaabay guddi kale oo Xafiiska ka tirsan oo sameeya liiska dadka u soo gudbaya imtixaanka. Sidaa darteed waxaa u gudbay wareegga labaad ee xulitaanka muwaadiniin ka badan (400) oo isugu jira rag iyo dumar oo ka kala yimid dalka gudahiisa iyo dibadiisaba. Waxaa guddigii khubarada ahaa ee hawsha u xilsaarnaa dajiyeen imtixaankii. Sixiddii imtixaanka kaddib, waxaa u gudbay wareegga wareysiga 60 qof. Waxaa wareysiga qaadistiisa hagayay Xeer Ilaaliyayaha Guud ee Qaranka, waxaana ku soo baxay labaatan Xeer ilaaliye oo ka mid yihiin afar dumar ah. Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa ku soo saaray dikreeto magacaabidda Xeer ilaaliyayaashaa.




[3]https://agosomalia.so/so/xayeysiin-fursado-shaqo-xafiiska-xeer-ilaaliyaha-guud-ee-qaranka/?fbclid=IwAR0WSlU3q0q-MRD9Q4-cZf-oW1MXcN5PXRTqVT4nanWR0ZL9kZmUttSt9rQ



Imtixaankii Xeer Ilaaliyeyaasha Cusub 2021



Imtixaankii Xeer Ilaaliyeyaasha Cusub 2021

## Qorshaha ku-tababarka-shaqada Xeer Ilaaliyaasha cusub

Kaddib markii la qaatay labaatanka Xeer ilaaliye ee cusub ee XIGQ, waxaa xafiisku dajiyay qorshe habeysan, dhinacyo badan taabanaya oo qorshaysan oo ku saabsan hawl-ku-tababarka xeer ilaaliyayaashaa. Ujeedada tababarka waa in la abuuro jawi ay xeer ilaaliyaayshani ku gudanayaan hawlahooda, laguna kobcinayo awoodda waxqabad ee la xiriirta dacwad-oogidda. Si gaar ah wuxuu tababarka haggiddu:

- Hubinayaa in xeer ilaaliye kastaa fursad tababar iyo hagid u helo hawlihiisa;
- Abuurayaa jawi lagu qiimaynayo aqoonta, kartida iyo waxqabadka xeer ilaaliyayaasha cusub ; iyo
- Abuurayaa jawi dacwad-oogid oo ku salaysan hufnaan iyo qiyam saree oo hawlqabad.

Habka loo raacayo tababar hagidani waa: in xeer ilaaliye walba oo cusub lagu liiliyo xeer ilaaliye kale oo khibrad leh oo ku dhiirrigaliya kuna haga hawlihiisa. Waxaa sidoo kale Meesha ku jira in loo qabto tababaro lagu siinayo cashirrada lagama maarmaanka u ah hawlahooda ee ku saabsna xeerarka kala duwan ee waddanka gaar ahaan Xeerarka Habka iyo kan Ciqaabta Soomaaliyeed, Dastuurka iyo sharciyada kale ee dalka.

Marka uu tababarku dhammaado waxaa la filayaa in:

- Xeer ilaaliye walba uu faham ka haysto shuruucda maamulidda galalaka ciqaabta, awoodaha iyo waajibaadka Xafiiska;
- Suurgasho in xeer ilaaliye walba ka go'aan gaari karo diyaarinna karo xaashida eedda, diyaarin karo qoraalada maxkamadda horteeda kana doodi karo, iyo inuu fahmo dabbaqina karo nidaamka wadashaqaynta booliska iyo hay'adaha kale ee xafiiska la shaqeeya; iyo
- In uu si madaxbannaan oo iskii ah u oogi karo una hagi karo dacwadaha ciqaabta.

Marka ay dhammaato tababar hagiddan oo ugu yaraan qaadanaysa saddex bilood, waxaa jira doona nidaam qiimayneed oo lagu xaqiijinyo aqoonta, kartida iyo waxqabadka xeer ilaaliye walba oo inuu oogi karo hagina karo dacwadaha ciqaabta isaga oo ka wakiil ah Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka[4].

---

[4] Qorshaha faahfaahsan ee tababar hagidda iyo casharada ay qaadanayaan ayaa diyaarsan.




Daahfurka Tababarka ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo XIGQ



## Qaybta Tababarrada Xafiiska

Laga soo bilaabo sanadkii 2015- ilaa 2021, Xafiiska wuxuu tababar ku hawl-galid shaqooyinka (mentorship) garsoorka siiyay Jaamiciyiin ka soo kala baxay Jaamacdadaha dalka caddadkoodu gaarayo ilaa 183 sharci yaqaan:

- Rag tiradoodu tahay 152; iyo
- Dumar tiradoodu tahay 31 ruux

Wiilashan iyo gabdahan ayaa kaddib tababarka ay Xafiiska ku qaateen u suurtagashay inay ka shaqo galaan garsoorka kaddib markii ay ku soo baxeen imtixaanada maxkammada iyo kuwa xeer ilaalinta, qaar kalana waxay noqdeen qareenno ku gudba imtixaanka qareenimo. Waxaa

xusid mudan in dadka ku gudbay imtixaanka xeer ilaaliyayaasha ay qaarkood yihiin dadkii ka fa'idaystay shaqo-ku-tababarkan.

## Aqoon is-waydaarsiga Xafiiska iyo Qorshaynta

### Qorshaynta Gudaha

Waxaa sannadkii tagay xoogga la saaray in la casriyeeyo lana kobciyo awoodda qorshayn ee gudaha Xafiiska sidoo kalana la darso xiriirka Xafiisku la leeyahay hay'adaha ay wadashaqaynta leeyihiin sida Booliska iyo Maxkamadaha. Markaa 25kii Jannaayo 2021, wuxuu xeer ilaaliyuhu guddoomiyay shir ay ka soo qaybgaleen dhammaan xeer ilaaliyayaasha, agaasimayaasha iyo mas'uuliyiinta sare ee Xafiiska. Ujeedada shirku waxay ahayd:

- In la qiimeeyo waxqabadka Xafiiska ee sannadka 2020;
- In waax kasta oo ka mid ah waaxaha xafiiska sida: Waaxda Danbiyada Culus, Waaxda Tacaddiyada Jinsiga, iyo Waaxda Kormeerka Xabsiyada iyo Boolisku ay soo diyaariyaan qorshahooda sannadka; iyo
- In la soo gudbiyo tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu kobciyo waxqabadka Xafiiska.



Kaddib shirkaa dardargalinta hawlaha Xafiiska ee sannadka 2021, waxaa la isla gartay in ay lagama maarmaan tahay si loo horumariyo waajibaadka shaqo in la sameeyo daraasado ku saabsan caqabadaha Xafiiska horyaala iyo sidii looga gudbi lahaa .

Waxaa la garaystay, marka lagu daro arrimaha gudaha xafiiska inay jiraan hawlo ka

baxsan xafiiska oo saameyn ku yeelan kara waxqabadkiisa. Sidaa darteed waxaa lagama maarmaan noqotay in la dhiso saddex guddi oo soo darsa:

- Guddiga Baarista hawlaha Booliska;
- Guddiga Baarista hawlaha Xeer Ilaalinta; iyo
- Guddiga soo Bandhigista Caqabadaha ku Xeeran XIGQ ee la xiriira Maxkamadaha.

Guddi kasta waxaa la faray in ay muujiyaan caqabadaha jira, soo bandhigaan waxa shuruucda iyo xeerarka kale ee la xiriira caqbadahan, soo uruuriyaan caddeymo la xiriira caqabadaha soona gudbiyaan xalka caqabadahaas. Guddiyadaas waxay soo diyaariyeen warbixinno la xiriira hawlahooda waxaana in badan lagu saleeyay hawlaha Xafiiska. Waxaan si gaar ah u soo bandhigi doonaa hawlaha laga qabtay kobcinta xiriirka ka dhaxeeya Xafiiska iyo Maxkamadaha.

## Aqoon is-waydaarsiga Xafiiska

La taliyaha Sharciga ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha ayaa soo jeediyay in la qabto aqoon is-waydaarsi gudaha oo lagu dhisayo aqoonta xeer ilaaliyayaasha sidoo kalana lagu qaadanayo faham midaysan oo ku saabsan qaybo ka mid ah Xeerka Ciqaabta ama Habka Ciqaabta oo u baahan in si dheerad ah loo iftiimayo. Iyadoo taasi laga duulayo ayaa waxaa sannadkan la qabtay laba aqoon is-waydaarsi oo ku kala saabsan rafcaanka dacwadaha ciqaabta iyo qiraalka.

Aqoon is-waydaarsiga ku saabsanaa rafcaanka dacwadaha ciqaabta waxaa looga hadlay:

- Yaa rafcaan qaadan kara?
- Maxay yihiin qaraarada ama go'aanada rafcaan laga qaadan karo goormaase la qaadan karaa?
- Goorma ayaa rafcaan la diidi karaa in la aqbalo?
- Habka iyo wakhtiga lagu qaadanayo rafcaanka?
- Ogaysiinta iyo qodobada lagu salaynayo rafcaanka.
- Rafcaanka iyo fulinta xukunnada; iyo
- Dhagaysiga rafcaanka.



Aqoon is-waydaarsiga labaad oo la qabtay Bishii November wuxuu ku saabsaanaa qiraalka. Waxaa si gaar ah looga hadlay:

- Waa maxay qiraal?
- Waa maxay oggolaansho?
- Maxay ku kala duwan yihiin qiraal iyo oggolaansho?
- Waa maxay shuruudaha iyo habka loo qaadayo qiraalka iyo oggolaanshahaba?
- Waa maxay hanaanka xeerarka Soomaaliyeed ku hubinayaan in qiraalka loo qaaday si iskeed ah oo xeerka waafaqsan?
- Adeegsiga qiraalka iyo oggolaanshaha ee caddayn ahaan maxkamad horteed.

Soo jeedinadaas oo si qoto dheer u habaysnaa ayaa waxa ay fursad u siisay xeer ilaaliyayaasha inay ka wada qaybgalaan ayna fududayso fahmaka laga haysto xeerka ee arrimahaa laga hadlay. Waxaa kaloo la is waydaarsaday doodo kale oo ku saabsan guud ahaan dhinacyo kale oo taabanaya dacwadaynta iyo doodaha maxkamadda hortooda.



## Tababarrada Kale

Bishii Ogosto dhexdeeda Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka ,Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka iyo Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayaa si wadajir u daah furay tababar soconaya muddo isbuuc ah kaasoo ay ka faa'idaysanayaan Baarayaal iyo Taliyeyaasha Saldhigyada Booliska Gobolka Banaadir.

Tababarka oo socday muddo laba todobaad ah ayaa waxaa bixinayay khubaro ku xeel dheer Sharciga Kalluumeysiga iyadoo ay iska kashanaayaan hay`addaha UNODC & FAO. Tababarkan oo ujeedadiisu ilaalinta baddaha dalka iyo dhowridda xuquuqda kalluumeysatadeena, waxaa lagu falanqeeyay:

- Hordhac ku saabsan sharciga baddaha iyo kaluumeysiga;
- Aaladaha iyo hannaanka kalluumaysiga;
- Hergilinta waajibaadka iyo sharciga kaluumeysiga qaranka;
- Hagitaan wax-ku-ool ah oo ku saabsan kormeerka, falanqaynta dembiyada kalluumaysiga iyo xadgudubyada
- Soo bandhigidda cadaymaha dacawdaha kalluumaysiga shaci-darrada ah, iyo dacwad ku oogidda dambiyada kalluumaysiga;

xeerilaaliyahaGuud @Agosomalia ago.gov.so
info@ago.gov.so +25261774770 4949



6-17 October 2021 Xeer Ilaaliyeyaal ka tirsan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xeer Ilaaliyayaasha DXF xubno ka tirsan laanta Garsoorka ayaa Magaalada Victoria ee dalka Seychelles kusoo qaatay tababar la xariira Sharciga Kaluumeysiga iyo Badaha

Tababarka oo socday mudo laba todobaad ayaa waxaa bixinaayaa quburo dhanka sharciga kaluumeysiga ah iyadoo ay iska kashanaayaan hay`addaha UNODC & FAO, waxaana lagu qaadanaayaa :

- Hordhac ku saabsan sharciga baddaha iyo kaluumeysiga
- Aaladaha kalluumeysiga, kuwa wax xira iyo kuwa aan ku xirneyn
- Hergilinta waajibaadka iyo sharciga kaluumeysiga qaranka
- Hagitaan wax ku ool ah oo ku saabsan kormeerka, falanqaynta dembiyada kalluumaysiga iyo xadgudubyada diritaan iyo soo bandhigid cadaymo, iyo dacwad ku oogidda dambiyada kalluumaysiga.
- Iyadoo ujeedadda laga leeyahay tababarkaan ay tahay ilaalinta baddaha dalka iyo dhowridda xuquuqda kaluumeysatadda.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo ay ahmiyad gaar ah u leedahay tayeynta sharciga iyo ilaalinta sharuucda baddaha, gaar ahaan kuwa khuseeya ladagaalanka kaluumaysiga sharci daradda ah ayaa wado dadaalo lagu tayeeynaayo aqoonta xeer ilaaliyeyaasha dalka.





19kii Oktoobar 2021, Guddoomiyaha Maxkamadaa Sare ee Dalka iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa si wada jir ah u furay tababar la xariira ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada kaas oo socday muddo 4 maalmood ah. Tababarkan oo uu soo agaasimay Machadka Tababarka Garsoorka waxaa fududeysay hay’adda IDLO oo maalgelin ka heshay INL, waxaana ka qaybgalay garsoorayaal iyo Xeer ilaaliyayaal.




*Guddoomiyaha Maxkamadda, XIGQ, Madaxa INL Somalia, iyo Wakiilka IDLO Somalia oo tababarka furaya*

*ⒸINL Somalia*



## Tabarka Kaaliyeyaasha Xafiiska

Agaasinka Qorshaynta ayaa waxaa uu diyaariyey tababar lagu xoojinayo aqoonta iyo xirfadda kaaliyeyaasha XIGQ. Tabarbarkan wuxuu socday muddo saddex maalmooda. Tababarkan waxaa lagu bartay habka qorista iyo diyaarinta warbixinta xafiiska (formal

report writing), xog-urrinta (data collection) joogtaynta dabagalka iyo qiimeynta hanaanka iyo tayada howlaha (Monitoring and Evaluation) ee XIGQ. Tababarkan waxaa ka qaybgalay kaliyeyaal tiradoodu tahay 16 xubnood. Kaaliyeyaashaa 4 ka mid ah ayaa dumar ahaa. Ka fa'ideystayaasha tababarkan ayuu xafiiska wuxuu guddoonsiiyey shahaadada ka qaybgalka tababarka xoojinta xirfada iyo aqoonta. Tababarkani wuxuu qayb ka yahay qorsheyaasha lagu xoojinayo xirfadda iyo aqoonta dhammaan shaqaalaha ka howl gala XIGQ.






## Xiriirka Xafiisyada Xeer Ilaalin DXF iyo XIGQ

Waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka u arkaa inay lagama maarmaan tahay in la adkeeyo isku xirnaanta, wada shaqaynta iyo iswaydaarsiga aqooneed ee ka dhaxeeya XIGQ iyo Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF. Waxaa sannad walba la qabtaa

Shirweynaha Xeer Ilaaliyayaasha Soomaaliyeed. Shirweynahaa oo sannad walba leh mowduuc gaar ah waxaa guud ahaa lagaga xaajoodaa adkaynta xiriirka Xafiisyada, is waydaarsiga aqoonta, xogta kiisaska iyo tayeynta Xafiisyada. Shirweynaha Sannadkan wuxuu qorshuhu yahay in la qabto bisha Febraayo.




Waxaa sannadkan la qaybiyay warqadda dhaawac-muujinta oo uu diyaariayay Xafiiska, laguna ansixiyay Shirkii Saddexaad ee Xeer Ilaaliyayaasha. Warqaddan oo ah mid ay tayadeedu sarreyso oo aan la been abuuri karin, biyuhu karin, la dillaacin karin, lanbaraysan, sidoo kalana jaan go’an ayaa waxay wax ka qabanaysaa in la nidaamiyo nidaamka dhaawac-muujinta.



## Tababarka Xeer Ilaaliyaayaasha iyo Baarayaasha DXF

Mid ka mid ah hawlaha hortabinta leh ee uu Xafiisku xoogga saaray ayaa ah in la kobciyo awoodda Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF. Si loo dhiso awooddaa waxaa xogga la saaray in la tababaro Xeer Illaaliyayaasha iyo waliba baarayaasha ka hawlgala dhammaan DXF. Iyadoo taas laga duulayo, ayaa XXGQ isagoo la kaasahanaya IDLO ayaa waxaa loo qabtay dhamman Xeer Ilaaliyayaasha DXF 2 tabarar oo mid walba ka

kooban yahay 5 maalmood. Tababarka kowaad wuxuu xoogga saaray mabaadi'da Xeerka Habka iyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. Tababarkani oo ah mid aqoon-is-weydaarsi ah, waxaa macluumaad loo jeediyay tababartayaasha, si ay macluumaadkaas iyo tusaalayaasha halkaa lagu xusay ugu dabaqaan hawl-maalmeedkooda.

Si gaar ah waxaa loo faahfaahiyay sharciyadda Xafiisyada Xeer Illaalinta, waajibaadka xeer ilaaliyaha, iyo halbeegyada lagama maarmaanka u ah hawlgalkooda. Waxaa kaloo la eegay awood-garsoorka (ikhtisaaska) faldanbiyeedyada. Waxaa la sharraxay cunsurada faldanbiyeedyada ee kala ah kan maatar (maaddo) iyo kan maanka intaba. Waxaa la xusay hannaanka iyo shuruudaha xarigga, baaridda iyo taabidda (qabashada), xarigga ka horreeya dacwadeynta, wakhtiga sharcigu u xadiday rumaanka, damaanadda iyo amar maxkamad horkeenis. Ugu danbayan waxaa la dul-istaagay go'aanka eedaynta. Si loo helo hannaan ay wada dhaqan galiyaan xeer-ilaaliyayaasha oo ku saabsan go'aan ka gaarista eedaynta, waxaa Xafiiska Xeer-Ilaaliyayaha Guud ee Qaranku soo saaray Hage ku saabsan Go'aanka Dacwad-oogidda. Waxaa sidaa daraadeed la falanqeeyay hagahaa ka go'aan gaaridda eedaynta. Waxay fursad u heleen xeer iaaliyayaashu inay ku tababartaan diyaarin xaashi eed iyadoo lagu saleynayo muunad iyo dhacdo diyaarsan.

Tababarka labaad oo isaguna 5 maalmood soconayay waxaa qaatay xeer ilaaliyaaysha DXF. Tababarku waxaa uu ku socday xaqiiqo keli ah (*a single fact pattern*), oo wax laga qabanayay halkii maalinba. Tababarka waxaa loogu talogaley in uu ahaado mid aqoon-isweydaarsi ah *(interactive*), kaas oo macluumaadka loo bandhigayo tababartayaasha ka dibna ay tababartayaashu ku dabaqayeen xaqiiqda keliya. Maalinta koowaad waxaa la soo bandhigay xaqiiqda waxaana diiradda la saaray tallaabooyinka la qaadey si loo sugo goobta fal-dembiyeedku ka dhacay iyo sidoo kale istiraatiijiyada iyo geeddi-socodyada wareysiga markhaatiyada. Maalinta labaad waxaa looga munaaqashooday habraacyada caddeynta looga soo ururinayo goobta fal-dembiyeedku ka dhacay loona lafagurayo. Maalinta saddexaad waxaa ay la xiriirtay baaritaanno dheeri ah, oo ay ka mid yihiin soo-helidda markhaatiyada iyo su'aalo-weydiinta qof la tuhunsan yahay. Maalinta afaraad waxaa ay diiradda saartay sida la isugu geynayo macluumaadkii la soo ururiyey intii dembi-baaristu ay socotey iyo sida loogu bandhigayo xeer-ilaaliye. Maalinta shanaad waxaa looga hadlayay dhibaatooyinka dembi-baarista ee gaar ahaan lala xiriiriyo kiisaska la xiriira tacaddiyada jinsiga ku saleysan.

Tababarka saddexaad oo afar maalmood ahaa wuxuu kulmiyay Xeer ilaaliyaaysha iyo baarayaasha DXF. Ujeedada tababarkan afarta maalmood ah wuxuu ahaa in ay isbartaan ayna wada hawlgalaan xeer ilaaliyayaasha iyo baarayaashu si ay u hubiyaan si qoto-dheerna u lafaguraan meelaha ay iska galaan hawlahoodu. Waxaa si gaar ah xoogga loo saaray inay fahmaan hannnaanka mid walba ula falgalo faldanbiyeedyada una gartaan

waajibaadka ay kala leeyihiin iyo kuwa ay wadaagaanba. Tababarkani wuxuu lahaa shan ujeeddo oo kala ah:

- in xeer ilaaliyayaasha iyo baarayaashu fahmaan dawrkooda ku aaddan cadaalad-danbiyeedka iyo ahdaafta ay wadaagaan iyo waajibaadkoodaba;
- inay qiimeeyaan habka ay baarayaashu galkooda u maamulaan;
- in la isla eego sida ay xeer ilaaliyayaasha iyo baarayaashu u wadashaqeeyaan xilliga dhagaysiga dacwada si loo hubiyo in caddeymaha maxkamadda loogu soo bandhigay qaab muujinaya inuu habboon yahay, la oggol yahay laguna kalsoonaan karo;
- in la fahmo isticmaalka iyo gaabiska oraahaha markhaatiga xilliga dacwadeynta galka ciqaabta ah; iyo
- in la soo bandhigo in arrimahaas aan xusnay ay si gaar ah saameyn ugu yeelan karaan dacwadeynta kiisaska ku salaysan tacaddiga jinsiga.

Tababar wallaba waxaa la socday tilmaanshe faahfaahsan oo ay Xeer ilaaliyaasha iyo baarayaashu u isticmaalayeen marjac ahaan iyo Xeerarka Habka iyo kan Ciqaabta Soomaaliyeed.

Tababarkan waxaa ka fa'idaystay 57 Xeer Ilaaliye oo 11 ka mid ahi ay dumar yihiin iyo 69 Baare oo 15 ka mid ahi ay yihiin dumar. Guud ahaan tababarkan oo ay ka fa'idaysteen 140 xeer ilaaliye iyo baare oo ka mid ah xeer ilaaliyayaasha iyo baarayaasha DXF. Boqollay ahaan dumarka ka fa'idaystay waxay u dhigantaa 19%.





**Tababarka Xeer Ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha Galmudug**



Tababarka Xeer Ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha Hirshabelle




Tababarka Xeer Ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha Jubaland




**Tababarka Xeer Ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha Puntland**



**Tababarka Xeer Ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha Koonfur Galbeed**

## Xiriirka XXGQ iyo Maxkamadaha

Wadashaqaynta xeer ilaalinta iyo maxkamaduhu waxay udub-dhexaad u tahay hirgalinta xeerka ciqaabta iyo cadaaladda. Guud ahaan, maxkamaduha waxa ay dhex-dhexaad ka yihiin doodaha iska soo horjeeda ee eedaynta xeer ilaalinta iyo difaaca eedaysanaha. Markaa, waa inaynan dhinac u muuqan sida sharcigu qabo si loo gaaro cadaaladda dhab ah.

Dokumentiyada ka baxa xeer ilaalinta ee ku socda maxkamadaha waxaa ka mid ah: codsiga waaranka soo qabasho, waaran baariseed iyo taabasho, muddayn maxkamadayn iyo kuwa kale. Codsiyadaas waa in jawaab dagdag ah laga helaa. Waxaa jira ammarro ay maxkamaddu qaado oo iyana ay lagama maarmaan tahay in xafiisku uu dhan ka ahaado ka hor amaradda ama la ogaysiiyo marka ay dhacaan. Waxaa lagama maarmaan ah markaa in in gaarsiintu dhacdo wakhtiga ku habboon si xilka xeer ilaalinta ay uga gutaan wakhtiga ku habboon.

Diyaar-garowga dhageysiga dacwadaha waa arrin u dhaxaysa maxkamadda ,Xeer Ilaalinta iyo difaaca eedaysanaha, waxaana ay u baahantahay in si wadajir ah loo xalliyo iyadoo la eegayo duruufaha cuslaanta danbiga, iyo jadwalka dhinacyada.

Waxaa jira arrimo sharcigu ka hadlay laakiin u baahan faahfaahin iyo faham midaysan. Markaa iyadoo la raacayo Qod: 5(2)^aad^ ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer lr: 3 ee 12 Juun 1962, oo awood u siinaya Maxkamadda Sare inay hubiso in sharciga si midaysan loo dabbaqo, waxaa jira qodobo iyo habraacyo ay lagama maarmaan tahay in xeer nidaamiye laga soo saaro. Arrimahaas aan xusnay ee xeer nidaamiyaha u baahan waxaa ka mid ah habka damaanad sii daynta iyo dhaqangalintiisa. Waxaa dhacda in qof damaanad lagu sii daayo iyada aan la ogaysiin Xafiiska Xeer Ilaalinta fursadna loo siin inuu soo gudbiyo ishortaagga ku habboon.

Waxaa kaloo ka mid ah habraaca dacwadaha ciqaabta ah ee dhinacyadu ka heshiiyaan. Mararka qaark waxaa dhici karta in duruufuhu saamaxaan in la tixgaliyo heshiishka dhibanaha iyo eedaysanaha; haddana ma aha in heshiiskaasi uu caqabad ku noqdo cadaaladda ama danta guud. Waxaa lagama maarmaan noqon karta in markaa la marsiiyo ciqaab eedaysanaha xataa marka ay heshiiyaan dhinacyadu. Waxaa kaloo u baahan faham gaar ah iyo tixgalin duruufaha waddanka ka jira, marka Maxkamadda darajda kowaad ku wayday falka eedaysane lagu soo eedeeyay. Waxaa markaa lagama maarmaan noqonaysa in iyadoo la tixgalinayo duruufta dalka laga feejignaado inuu eedaysanuhu baxsado. Xeerku wuxuu oggolyahay in tallaabooyin nabadgalyo (security measures) la saaro si loo hubiyo in eedaysanaha la helo marka loo baahdo.

## Wada-tashiga Ha'yadaha Garsoorka Dalka

Si loo horumariyo wada shaqaynta maxkamadaha iyo xafiiska xeer ilaalinta waxaa 19 August 2021 waxaa la qabtay shir ay ujeedadiisu ahayd sixidda khaladaadka jira iyo caqabadaha hortaagan sidii loo horumarin lahaa wadashaqaynta. Shirkaas oo mira dhalay waxaa laga soo jeediyay mowduucyo kala duwan oo ku saabsan hawlaha garsoorka.

Arrimihii lagu xusay shirka qaar ka mid ah ayaa markiiba la dhaqangaliyay. Waaxaa tusaale loo soo qaadan karaa maareynta heshiisyadda la xiriira dacwadaha lagu dhaqaajiyo xafiis ahaan iyo sida ay wax tar ugu yihiin eedaysanaha,. Waxaa dhacda in dil bareer ah oo waliba qaarkood si fool xun loo galo, heshiiskooda la horkeeno maxkamadaha. Arintaas waxaa la arkay inay mudan tahay in iyadoo la tixgalianayo heshiiska haddana mar kasta maanka lagu hayo cadaaladda iyo danta guud. Heshiiska diya-bixinta ama cafiska waxaa loo aqoonsananayaa sabab ciqaabta fududeysa. Heshiis diyo-bixin ama cafis waxay eedaysanaha ka dulqaadaysaa dilka toogashada ah (qisaasta) kaliya. ciqaabtiisu waa in aysan ka yaraan 15 sano oo xarig ah, oo ka dhigan tacsiirtii ay saartay dawladdu. Arrintan haddaba maxkamaduhu way hirgaliyeen. Tani waxay faa'ido wax ku ool u u tahay ilaalinta badqabka nafta iyo waxkaqabashada dilalka macno-darrada ah ee dhaca.

### Go'aannada Shirka

- In go'aan kasta oo uu gaarayo Garsooraha uu og ka siiyo XIGQ iyo ciddii ay taabanayso.
- In xeer ilaaliyayaashu u gudbiyaan codsiyada galalka garsooraha gacanta ku haya galka uu codisugu khuseeyo, lana tacaamulo Garsooraha guddoominaya dacwadda.
- In Eedaysanaha laga qoro qiraal waafaqsan sharciga haddii uu ku sameeyo Garsooraha hortiisa si aan loo baab'in caddeyntaas.
- In marka uu u dirayo garsooruhu eedaysane Xabsi ku meel gaar ah uu ku caddeeyo amarka xabsi u diridda goobta uu amray in lagu hayo eedaysanaha isla markaana ku wargaliyo XIGQ si loogu caddeeyo xaashida eeda.
- In dhinacyada ay ilaaliyaan habsami u socodka iyo anshaxa ka doodista Maxkamadaha hortooda, loona hoggaansamo amarka garsooraha maamulaya fadhiga si waafaqsan qodobka 99 XHC.
- In la waafajiyo qaab-qoraalka Xaashida Eedda qodobka 71 ee XHC islamarkaana si buuxdo loo hubiyo ka hor inta uusan gaarin Maxkamadda.
- In la sababeeyo dhamaan Go'aanada kasoo baxayo XIGQ, Maxkamadaha iyo Booliska si waafaqsan shuruucda dalka.

- In aan la dhagaysan dacwad ciqaab ah oo aan XIGQ qayb ka ahayn si aanu xukunku u noqon baadil si waafaqsan qodobka 91 XHC.
- In garsooraha galayo wax ka badan hal dacwo uu waqtiga u kala duwo dhagasyiga dacwadaha, kaalintuna ay is waafajiso jadwalka dacwadaha si aanu u iman is ku-dhac wakhti.
- In xeer ilaaliyaha loo soo muddeeyay hal dacwo ka badan codsado in waqtiga loo kala baddalo iyada uu ogaysiinayo garsooraha soo saaray muddaynta danbe.
- In codsiyada uu xafiisku u soo qoro maxkamadaha garsoorayaashu ka jawaabaan, iyada oo la sababaynayo go'aanka jawaabta si waafaqsan qodobka 84 XHC.
- In go'aanada soo baxa inta lagu guda jiro dhagaysiga dacwadda haddii XIGQ uu ku qanci waayo uu qorto waxii uu u arko khalad isaga oo aan wax u dhimin habsami u socodka dacwada isla markaana uu ku darsado sababaha rafcaan-qaadashada haddii uu rafcaan ka qaato go'aanka kama dambaysta ah.
- In xeer ilaaliyaha ka qayb galaya dacwad lagu dhawaaqayo go'aankeeda uu diyaarsado rafcaan qaadashada haddii aanu ku qancin go'aanka, isaga oo aan xabsi ku haynta kaliya ka rafcaan qaadan.
- In la helo nidaam Electronic ah oo is ku xira Maxkamadaha, Xeer ilaalinta iyo Booliska, kaas oo fududaynaya in warqadaha laysku dhaafsado, laguna soo diro taarka, xarig iyo siidayn kasta si waafaqsan qodobada 24(1)B iyo 33 XHC.
- In dacwadaha madaniga aan ciqaab loo baddalin.
- In hage la ga soo saaro qaabka loo maaraynayo eedaysanayaasha Maxkamadda darajda kowaad ku waysay falka lagu soo eedeeyay sharciguna faray in xoriyadooda la siiyo isla markaana maadaama ay adag tahay in dib loo helo sababo la xariira xaaladda guud ee wadanka ka jirta.

Marka la isku daro waxaa la oran karaa in laga gaaray guul inta badan qodobadan sare ku xusan kaddib shirkii August 2021 ee u dhexeeyay Xafiiska XIGQ iyo Maxkamaddaha dalka.

## Adkaynta Xiriirka Xafiiska iyo Hay'adaha Caalamka

1 Feb 2021 Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka ayaa Xafiiskiisa ku qaabilay Ilhami Turus oo ka tirsan Hayadda hormarinta TIKA, waxaayna ka wada hadaleen hormarinta Xafiska gaar ahaan dhismaha Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo ku burburay Dagaaladii sokeeye.





**30-kii Ogosto 2021** Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Dr. Sulayman Maxamed Maxamuud ,ayaa kulan la yeeshay Ku-simaha Madaxa Ergada, Dr. Fabian Loewenberg iyo La-taliyayaasha Dib-u-habaynta Sharciga ee Hawlgalka, Jussi Ohisalo, Albert Van Nunen Karen iyo Andres Moreno. waxayna kawada hadlayn arrimo badan oo labadda oo ay ugu muhiimsanaayeen unkidda Unuga Dambiyada Badaha oo uu bilowgii sanadka 2021 Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ku soo kordhiyay waaxayaha Xafiiska unugaan oo awood u siinaysaa Xeer-ilaaliyeyaasha inay wax ka qabtaan dembiyada halista ah ee lagu galo badda. XG ayaa ugu dambeenti yiri Waxaan uga mahadcelinayaa in EUCAP Somalia ay taageerto unuggaan cusub".



30 Nov 2021 XIGQ la yeeshay Saraakiil heersare ah oo ka socda Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabishan Dambiyada iyo Daroogada. Waxay ka wada hadalayn arrimo ay ka mid yihiin kalluumeysiga sharci-darrada ah, iyo in Xafiiska Xeer Ilaalinta uu helo nidaam casri ah oo si danabaysan loogu maamulayo dacwadaha.





## Wacyigalinta hawlaha Xafiiska

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka wuxuu Sanadki 2021 sameeyay wacyigelin mira dhashay. Waxaa kamid ahaa:

1. Wacyigelin ku saabsaneyd waajibaadka iyo hawlaha Xafiisku uu u hayo muwaadiniinta Soomaliyeed**.** Maadaama laga yaabo in laan fursad loo helin ama aan la akhrisan karin xeerarka xusaya waajibaadka iyo hawlaha XIGQ, Xafiisku waxa uu adeegsaday booorar oo ay ku xardhan yihiin oraahyo gaagaaban oo ka turjumaya in howlaha Xafiisku uu u qabto bulshada ee yihiin lacag la'aan. Sidoo kale si looga baaqsado in muwaadinku uu ka dhumo waqti badan Xafiisku waxa uu sameeyay lanbar gaaban oo uu si toos ah uga heli karo warbixinada la xiriira galka uga furan Xafiiska iyo meesha uu marayo.







2. Xafiiska oo kaduulaya hufnaanta shaqada iyo qanaacada muwaadiniinta waxa uu sidoo kale sameeyay number ay si toos ah kala soo xiriiri karaan haddii lacag la waydiiyo ama cabasho shaqada loo qabanayay ka qabaan .




3. XIGQ, waxa uu sanadkii tagay diiradda saaray xoojinta xiriirka dadweynaha si ruux walba ugu sahlanaato lasoo xiriirista waxa uu sameeyay numberka gaaban **4949** , sidoo kale bulshada waxa uu u fududeeyay waddo kasto oo ay kula soo xiriiri karaan Xafiiska ayaga oo adeesanaya baraha bulashada uu Xafiisku isticmaalo sida boorka hoose ku cad.



## Cudurka Koronafayras 2019 (COVID-19)

Cudurka fayraska korona 2019 (COVID-19) waa cudur neef mareenka ku dhaca. Siyaabo kala duwan ayuu u saameeyaa dadka. Inta badan dadka uu ku dhaco way ka kacaan iyagoo aan hosbitaal galin. Laakiin, dadka qaar ayaa uu ku noqdaa xanuun halis ah una baahan in ay hosbitaal galaan.  Dalkeenna Soomaaliya sida ay soo saartay Wasaaradda Caafimaadka waxaa ilaa Disanbar 2021 u dhintay dad ka badan 1333.

Waxaan shaki ku jirin in tallaalka COVID 19 uu qayb-lixaad leh ka qaato ka-hortagga ama yareynta saameynta cudurkaa. Soomaaliya waxaa ilaa iyo Disanbar 25keedii la qaatay 1,504,914 tallaal. Wasaaradda Caafimaadka waxa ay soo saartay in dhammaan shaqaalaha Dawladdu qaataan tallaalka COVID 19. Xafiisku waxa uu ka wacyigeliyay dhammaan shaqaalaha Xafiiska dhibaatada uu lee yahay cudurka Covid-19 iyada oo la raacayo tilmaamaha Wasaaradda Caafimaadka, waxaa lagu guuleysta in ay shaqaaluhu qaataan Talaalka cudurkaas si shaqadu aysan hakad u gelin lagana baaqsado fasaxyadi ku aadana inta uu cudurkaan bulshada si daran ugu baahay.

xeerilaaliyahaGuud
@Agosomalia
ago.gov.so
info@ago.gov.so
+25261774770
4949